



Xaashida Ka Qaybgalaha Daryeelka Joogtada

Tilmaamaha: U isticmaal xaashidan si aad u qorto sida macluumaadkani ula xiriirayo shaqadaada la xiriirta dhallaanka, carruurta yaryar, iyo qoysaskooda, iyo si aad uga qaybqaadato hawlaha kulankaan. Haddii aad u baahato meel dheeraad ah oo aad wax ku qorto, isticmaal dhabarka dambe ee boggan.

Qoraallada Qodobbada Muhiimka ah ee Tababarka



Sii wadista Daryeelka: Hawlaha Tababarka

Bogga 5. Dib u milicsiga

- ◆ Dib u milicso waayo-aragnimada lumitaanka iyo waayo-aragnimada lahaanshaha.

Bogga 7. Sii wadista Daryeelka

- ◆ Dib u milicso waayo-aragnimada aad ka caawinaysay ilmaha si uu uga gudbo welwelka kala-tagga. Tixgali waxa soo socda:
 - Muxuu ilmaha la kulmay?
 - Muxuu daryeel bixiyuhu la kulmay?
 - Muxuu qoysku la kulmay?

Bogga 9. Sababaha Daryeelka Joogtada ah

- ◆ Waa maxay sababta sii wadista daryeelka ay muhiim ugu tahay dhallaanka iyo ilmaha socod baradka?



- ◆ Sidee sii wadista daryeelka kor u qaada natiijooyinka wanaagsan ee ilmaha?

Bogga 11. Sii wadista Daryeelku waxa ay taageertaa Koriinka Dhallaanka/ Socod baradka

- ◆ Waa maxay tusaalooyinka qaar sida joogtada daryeelku u taageero korriinka dhallaanka/ilmaha socod baradka ah?

Bogga 12. Tusaale Muuqaal ah: Sii wadista Daryeelka

- ◆ Sidee ayuu sii wadista daryeelka u taageeri karaa carruurtaan iyo daryeel bixiyaha?

Bogga 14. Tixgeli Joogteynta

- ◆ Maxaa maskaxda ku soo dhacaya marka aad ka fikirto dhisida sii wadista daryeelka ee ficil ahaan?

Bogga 20. Dib u milicsiga

- ◆ Maxaad haddaba samaynaysaa si aad u taageerto sii wadista daryeelkaaga maalinlaha ah?



- ◆ Waa maxay dariiqooyin dheeraadka ah oo aad ku xoojin karto sii wadista dhallaanka iyo socod-baradka ee ku jira daryeelkaaga?

Bogga 23. Sii wadista Daryeelka: Siyaasadaha iyo Hindisaha

- ◆ Sidee loo fahaa sii wadista daryeelka ama looga qeexaaa gobolkaaga, deegaankaaga, ama qabiilkaaga?

Bogga 25. Dhibaatooyinka iyo Xeeladaha Dhaqangelinta

- ◆ Waa maxay Dhibaatooyinka hortaagan hirgelinta?

- ◆ Waa maxay xeeladaha suurtagalka ah ee wax looga qabanayo Dhibaatooyinkaas?

Bogga 32. Aqoonso Tallaabo Kasta oo Yar oo Loo Qaado Sii wadista Daryeelka ... Sababtoo ah muhiim ayay u tahay Ilmo kasta!

- ◆ Qor fikradaha tallaabooyinka yaryar ee lagu hirgelin karo sii wadista daryeelka ee adiga kugu habboon.



Bogga 33. Fikradaha Muhiimka ah

- ◆ Maxaa si gaar ah kuu soo jiidatay?
- ◆ Maxaad dooneysa inaad xasuusataa?
- ◆ Sidee ayay tani ula xiriirtaa shaqadaada?

Xarunta Dhisidda Awoodda Gobollada (State Capacity Building Center, SCBC) waxay la shaqaysaa hoggaamiyeyaasha gobollada iyo dhulalka ay dawladdu xukunto iyo la-hawlgalayaashooda si ay u abuuraan nidaamyo iyo barnaamijyo carruurnimada hore ah oo hal-abuur leh kuwaas oo sare u qaada natiijooyinka carruurta iyo qoysaska. SCBC waxaa maalgelisa Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Maraykanka, Maamulka Carruurta iyo Qoysaska, Xafiiska Daryeelka Carruurta.

**State Capacity Building Center,
A Service of the Office of Child Care**

9300 Lee Highway
Fairfax, VA 22031

Taleefoonka: 877-296-2401
limaylka: CapacityBuildingCenter@ecetta.info

Isdiwaangeli si aad u hesho Wararka cusub
http://www.occ-cmc.org/occannouncements_sign-up/



ADMINISTRATION FOR
CHILDREN & FAMILIES

Foomka Su'aalaha: Sidaan ayaan u jeclahay!

Ka jawaab su'aalaha soo socda:

1. Haddii aan ilmo yar ahaan lahaa, waxaan jeclaan lahaa inay biyaha qubeyskaygu noqdaan:
___ aad u degan, ___ diiran, ___ ama aad u diiran.
2. Haddii aan ilmo yar ahaan lahaa, waxaan jeclaan lahaa in cuntadaydu la i siiyo adoo ah:
___ aad u degan, ___ xoogaa diiranl, ___ ama aad u diiran.
3. Haddii aan ilmo ahaan lahaa, waxaan jeclaan lahaa inaan seexdo qol uu heerkulkiisu yahay:
___ aad u degan, ___ xoogaa diiranl, ___ ama aad u diiran.
4. Si aan u seexdo, waxaan jeclaan lahaa dadka waaweyn:
___ inaan jiipto anoo kaligay ah, ___ in la ii heeso, ___ ama la i ruxo.

Waxa laga soo qaatay hawl ay sameysay Edna Rivera. © WestEd (2020). Barnaamijka loogu talagalay Daryeel bixiyaasha Dhallaanka/Ilmaha Sanad-baradka ah (PITC). PITC waa mashruuc ay wada fuliyaan Waaxda Waxbarashada ee California iyo WestEd, kaas oo socday tan iyo 1985.



Sii wadista Daryeelka

U isticmaal kheyraadkan si uu kaaga caawiyo caddeynta muhiimadda sii wadista daryeelka. Waxa uu gacan ka geysanayaa dhiirrigelinta hab-dhaqannada muhiimka ah ee barnaamijyada si loo hubiyo tayada daryeelka qoysaska ee carruurta lagu daryeelo guryaha iyo xarumaha, kuwaas oo u adeegaya dhallaanka iyo carruurta yaryar.

Mabda'a

Daryeelka tayada sare leh ee ku saleysan xiriirka ayaa door muhiim ah ka ciyaara Waynaanta Maskaxda carruurta yaryar, xakamaynta shucuurta, iyo barashada (Center on the Developing Child, 2012). Barnaamijka Daryeelka Dhallaanka/Ilmaha Sannad-baradka ah wuxuu ku talinayaa lix hab-dhaqameed oo muhiim ah oo ah qaab-dhismeedka daryeelka xidhiidhka ku salaysan, Mid ka mid ah dhaqamadan ayaa ah **sii wadista daryeelka**—dhaqanka ay daryeel bixiyaasha aasaasiga ah iyo carruurta wada joogaan inta suurtogalka ah, gaar ahaan carruurta 3 da sano ee ugu horreeya, abuurista fursado daryeel bixiyaha-ilmaha, daryeelaha-qoyska, iyo xiriirka ilmaha iyo ilmaha si ay u koraan, oo qoto dheer (Lally & Mangione, n.d.). Joogteynta dhaqamada daryeelka waxay taageeraan horumarinta ku-xidhnaan sugan iyo xidhiidho togan oo xooggan iyo sidoo kale saldhig sugan oo sahaminta iyo barashada (Honig, 2002). Cilmi baaristu waxay muujineysaa in amniga ku-xirnaanta ay si weyn uga qayb-qaadato horumarka shucuurta-bulshada ee fog ee carruurta iyo isku-kalsoonaanta (Sroufe et al., 2005).

Sii wadista daryeelka waxaa lagu bixin karaa goobaha daryeelka-kooxaha isku da' ama isku darka ah. Goobaha isku da'da ah, xeeladaha soo noqnoqda waa (1) in koox carruur ah lagu hayo hal deegaan oo loo badelo si ay ugu habboonaato baahiyaha carruurta marka ay koraan ama (2) in daryeel bixiyaha kooxda yar ee aasaasiga ah ee carruurta loo raro qolal ama meelo ku habboon awooddooda kobcin (Lally et al., 2009). Goobaha da'da isku dhafan, barnaamijku wuxuu u baahan yahay inuu hubiyo in deegaanku buuxiyo baahiyaha koox kasta oo loo adeego.

Waa maxay sababta Sii Wadista Daryeelka ay muhiim ugu tahay dhallaanka iyo ilmaha socod baradka?

- ◆ Sii wadista daryeelka waxay kordhisaa wakhtiga ay daryeel bixiyaasha iyo carruurta wada qaataan sidaa darteed waxay kordhisaa fursada daryeel bixiyaasha si ay u horumariyaan xidhiidh macno badan leh oo ay la yeeshaan carruurta waqti ka dib (Ruprecht et al., 2016).
- ◆ Marka dhallaanku uu helo fursad uu xiriir la yeesho daryeel bixiye xasaasi ah oo u jawaaba, ilmuhu waxa uu bartaa cidda uu ku kalsoon yahay iyo cidda dabooli doonta baahidiisa (Howes & Spieker, 2008).
- ◆ Aasaaska shucuurta ee wanaagsan ee ay bixiyaan cilaaqaadka caafimaadka qaba ayaa siinaya dhallaanka iyo ilmaha socod baradka ah badbaadada ay u baahan yihiin si ay wax uga bartaan adduunkooda oo ay khibrado u helaan (Ahnert et al., 2006; Howes & Spieker, 2008).
- ◆ Sii wadista daryeelka waxay kordhisaa fursadaha ay daryeel bixiyaashu wax ku bartaan dhallaanka gaarka ah iyo socod baradka iyo sidoo kale wakhti ay ku horumariyaan iskaashi shaqo oo togan oo qoysaska (McMullen et al., 2016).
- ◆ Joogitaanka daryeel bixiyaha joogtada ah, korriintu kaliya kor uma qaado waayo-aragnimada wanaagsan, laakiin sidoo kale waxay ka ilaalisaa dhallaanka iyo ilmaha socod-baradka ah dhacdooyinka nololaha ee walaaca leh (Raikes & Edwards, 2009; Golaha Sayniska Qaranka ee Ilmaha Soo Koraya, 2014).

Sidee Sii Wadista Daryeelka kor u qaada Natiijooyinka Wanaagsan ee ilmaha?

- ◆ Isdhexgalka daryeel bixiyaasha joogtada ah iyo kuwa ka jawaabaya waxay taageeraan waxbarashada dhallaanka iyo ilmaha socod baradka ah iyo horumarka meelaha ay ka midka yihiin nidaaminta shucuurta, dareenka, xusuusta, falalka qorsheynta, iyo is-xakamaynta (Tarullo et al., 2009).
- ◆ Daryeel bixiyaasha dareenka iyo kuwa wax ku oolka ah waxay kordhiyaan suurtagalnimada dhallaanka inay muujiyaan heerar sare oo ciyaarta asaagga ah iyo horumarinta luuqada (Machadka Qaranka ee Caafimaadka Carruurta iyo Horumarinta Aadanaha ee Daryeelka Dhallaanka iyo Horumarinta Dhallinyarada, 2005).
- ◆ Dhallaanka iyo ilmaha socod baradka ah ee la kulmay xiriir joogto ah, ammaan ah, jawaab celin leh ee ka hela bixiyaha xanaanada ayaa aad waxtar ugu leh cilaaqaadka ilmaha asaagooda ah marka loo eego dhiggooda (Raikes & Edwards, 2009).

Qorshaynta Hirgelinta Sii wadista Daryeelka ee Goobaha Daryeelka Carruurta ee Kala Duwan

Yoolka: Barnaamijyada tayada sare leh ee dhallaanka iyo ilmaha socod baradka ah waxay ku celceliyaan sii wadista daryeelka dhammaan dhallaanka iyo socod baradka.

- ◆ Samee hab lagu sii wado daryeelka si ay carruurta u helaan daryeel bixiyaha aasaasiga ah ee koowaad oo isku mid ah ilaa 3 sano ama inta lagu jiro muddada diiwaangelinta.
- ◆ Hirgeli hagitaan qoraal ah oo taageera sii wadista daryeelka u qabaysan dhaqan ahaan dhammaan barnaamijka. Tan waxa ku jira abuurista buug-gacmeedyo shaqaale iyo qoys wadaaga muhiimada, iyo sidoo kale ku dhaqanka, sii wadista daryeelka.
- ◆ Samee sharraxaado cad oo shaqo oo loogu talagalay daryeel-bixiyeyaasha dhallaanka iyo carruurta yaryar kuwaas oo ku jira filashooyin la xiriira hababka sii wadista daryeelka.
- ◆ Ka qaybgal, abuur, ama u dood horumarinta xirfada ee wax ka qabta sii wadista daryeelka. Taageer wada hadallada socda ee lala yeesho maamulayaasha daryeelka carruurta ee xarun ku-salaysan ama qoyska si loo sii wado daryeelka.
- ◆ Adeegso hab dib-u-eegis oo ula kac ah si joogto ah loo xoojiyo sii wadista daryeelka ee guud ahaan xarunta ama barnaamijka daryeelka carruurta ee qoyska.



Tixraacyada

- Ahnert, L., Pinquart, M., & Lamb, M. E. (2006). Badqabka cilaqaadka carruurta ee bixiyaasha daryeelka aan waalidka ahayn: (Security of children's relationships with nonparental care providers): Falanqeynta Xogta Hoose. *Kobaca Carruurta*, 77, 664–679.
- Center on the Developing Child. (2012). *Hawl Fulinta (Executive function): Xirfadaha nolasha iyo waxbarashada* [InBrief summary]. <http://developingchild.harvard.edu/resources/inbrief-executive-function/>
- Honig, A. (2002). *Ilaalinta Xiriirada: Korinta ku-xidhnaanta dhallaanka/ilmaha socod baradka ah ee goobaha daryeelka hore*. Ururka Qaranka ee Waxbarashada Carruurta Yaryar (National Association for the Education of Young Children).
- Howes, C., & Spieker, S. (2008). Xiriirada ku-xidhnaanta ee macnaha guud ee daryeel bixiyaasha badan. In J. Cassidy & P. Shaver (Eds.), *Buug gacmeedka Xiriirka: Aragti, cilmi baaris, iyo codsi caafimaad* (daabacaada 2aad. bogagga 317–332). Guilford Press.
- Lally, J. R., & Mangione, P. L. (n.d.). *Xog ku saabsan Barnaamijka Xannaanada Dhallaanka/Ilmaha socod baradka ah*. WestEd; Waaxda Waxbarashada California. Waxaa bishii Maarso 10, 2020, laga soo xigtay <https://www.pitc.org/about>
- Lally, J. R., Stewart, J., & Greenwald, D. (Eds.). (2009). *Daryeellida dhallaanka/socod-baradka (Infant/toddler caregiving): Hagaha dejinta deegaanada* (daabacaada 2aad). Waaxda Waxbarashada California.
- McMullen, M. B., Yun, N., Mihai, A. & Kim, H. (2016). Waaya-aragnimada waalidiinta iyo xirfadlayaasha barnaamijyada daryeelka joogtada ah ee sida wanaagsan loo aasaasay. *Waxbarashada iyo Hormarka*, 27, 190–220.
- Machadka Qaranka ee Caafimaadka Carruurta iyo Daraasada Horumarinta Aadanaha ee Daryeelka Dhallaanka iyo Horumarinta Dhallinyarada. (2005). *Horumarka ilmaha iyo Daryeelka ilmaha: Natiijooyinka ka soo baxay daraasada NICHD ee daryeelka carruurta iyo korriinka dhalinyarada*. Guilford Press.
- Gollaha Sayniska Qaranka ee Ilmaha Koraaya (National Scientific Council on the Developing Child.). (2014). *Cadaadiska xad dhaafka ah wuxuu carqaladeeyaa qaab-dhismeedka maskaxda koreysa: Warqada shaqada 3*. http://developingchild.harvard.edu/wp-content/uploads/2005/05/Stress_Disrupts_Architecture_Developing_Brain-1.pdf
- Raikes, H., & Edwards, C. (2009). *Kordhinta qoob ka ciyaarka daryeelka dhallaanka iyo ilmaha socod baradka ah (Extending the dance in infant and toddler caregiving)*. Paul H. Brookes Publishing Company, Inc.
- Ruprecht, K., Elicker, J., & Choi, J. (2016). Sii wadida daryeelka, is dhexgalka daryeel bixiyaha - ilmaha, aqoonta bulsheed ee socod baradka iyo dabeecadaha dhibaataada (ntinuity of care, caregiver-child interactions, toddler social competence and problem behaviors). *Waxbarashada iyo Hormarka*, 27, 221–239.
- Sroufe, L. A., Egeland, B., Carlson, E., & Collins, W. A. (2005). *Horumarka qofka (The Development of the person): Daraasada Minnesota ee khatarta iyo la qabsiga laga bilaabo dhalashada ilaa qaangaarnimad*. Guilford Publications.
- Tarullo, A. R., Obradovic, J., & Gunnar, M. R. (2009). Is-xakameynta iyo horumarka maskaxda (Self-control and the developing brain). *Zero to Three*, 29(3), 31–37.

Xarunta Dhisidda Awoodda Gobollada (State Capacity Building Center, SCBC) waxay la shaqaysaa hoggaamiyeyaasha gobollada iyo dhulalka ay dawladdu xukunto iyo la-hawlgalayaashooda si ay u abuuraan nidaamyo iyo barnaamijyo carruurnimada hore ah oo hal-abuur leh kuwaas oo sare u qaada natiijooyinka carruurta iyo qoysaska. SCBC waxaa maalgelisa Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Maraykanka, Maamulka Carruurta iyo Qoysaska, Xafiiska Daryeelka Carruurta.

State Capacity Building Center, A Service of the Office of Child Care

9300 Lee Highway
Fairfax, VA 22031

Taleefoonka: 877-296-2401

limaylka: CapacityBuildingCenter@ecetta.info

Isdiwaangeli si aad u hesho Wararka cusub

http://www.occ-cmc.org/occannouncements_sign-up/



ADMINISTRATION FOR

CHILDREN & FAMILIES

Saddex qaab oo lagu gaaro Joogteynta Daryeelka

Xulashada Koowaad: Kooxda isku da'da ah waxay joogaan isku aag.

- Wax ka badel goobta si aad ula qabsato isbadellada korriinka ee carruurta.
- U badel alaabta guriga iyo qalabka si ay ugu habboonaato cabbirka koritaanka carruurta iyo heerka dhaqdhaqaaqa.
- Ku kaydi ama isticmaal meel kale alaabta guriga iyo qalabka aan hadda la isticmaalin (sariiraha, meelaha la fuulo ee gudaha, kuraasta yaryar, iyo miisaska).
- U badel qolka jifka ee dhallaanka meel lagu ciyaaro oo laba sano jir ku habboon marka ay carruurta koraan marxaladda dhallaanka ee ka weyn.
- Ku rakib saxanadaha iyo musqulaha hoose ee qol kasta oo loogu talagalay barashada musqusha.
- Ku badel ilmaha kooxda uu ka tagay ilmo ay isku da' yihiin.

Xulashada Labaad: Kooxda isku da'da ah waxay u guuraan qol kale marka carruurta koraan oo ay danahooda iyo awoodoodu isbadelaan.

- Kooxda ugu da'da weyn ee carruurta ayaa ka baxda barnaamijka, iyaga oo u sameynaya meel carruurta yaryar ku sameeyaan kobac.
- Marka dhallaanku u guuraan qolka ku xiga, ku badel koox cusub oo dhallaan ah.
- U ogolow wakhti oo dulqaad u lahoow carruurta iyo dadka waaweyn inay la qabsadaan qol cusub.
- U ogolow macallimiinta daryeelka dhallaanka/ilmaha socod baradka ah iyo carruurta inay alaabta ay jecel yihiin ula guuraan goobta cusub.
- Ku dar carruur cusub (ama koox kale oo hoose) qolka markay carruurta koraan oo saamiga iyo cabbirka kooxuhu ay isbeddelaan.
- Haddii loo baahdo, dhaqaaji hal koox aasaasiga ah ee carruurta iyo macalinka daryeelka, halkii kooxda oo dhan.
- Cabbiraada ku meel gaarka ah, haddii loo baahdo, u rar kooxda daryeelka aasaasiga ah dhanka macalinka daryeelka sare kaasoo xidhiidh dhow la yeeshay carruurta kooxda.

Xulashada Sadexaad: Kooxda da'da isku dhafka ah waxay joogaan isku aag.

- Goobtu waa inay noqotaa mid dabacsan oo ku filan inay qaabisho dhallaanka yaryar, ilmaha gurguurta, iyo kuwa ka weyn hal mar.
- Macallimiinta daryeelka dhallaanka iyo ilmaha socod baradka ah waxaa loo tababaray inay la shaqeeyaan kooxda da'da isku dhafan, iyo inay wax ka bartaan heerarka kala duwan ee horumarka.
- Carruurta kooxda ku jira waxa loo qaybin karaa kooxo daryeel oo aasaasiga ah ee isku da'da ah ama kooxaha daryeelka aasaasiga ah ee da'da isku dhafka ah leh.
- Ilmaha ka baxa kooxda waxa lagu badeli karaa ilmo da' kasta ah oo ku jira da'da kooxda.
- Ilmaha leh heerka korriinka ee isku midka ah wuxuu buuxin karaa furitaanka koox isku dhafka ah oo socod baradka ah. Looma baahna in furitaanka uu buuxiyo ilmo yar.

WestEd. 2014. "Handout II.3A: Saddex qaab oo lagu gaaro Joogteynta Daryeelka." Gudaha *Barnaamijka Buugga Tababaraha Daryeelka Dhallaanka/Ilmaha Socod baradka ah, Cutubka II: Daryeelka Kooxda*. daabacaada 2aad. (bogga 42). Sacramento, CA: Waaxda Waxbarashada California. Dukumiintigaan waxaa laga yaabaa in loo daabaco ujeedooyin waxbarasho.

Kooxda da'da isku dhafka ah ama Kooxda da'da isku midka ah? Waxay ku xiran tahay!

Xaalada Daryeelka	Kooxda isku da'da ag (da'da isku Dhow)	Kooxda da'da isku dhafka ah
Cilaaqaadka ilmaha isku faca ah:	Carruurta heerka korriin ee isku midka ah ee wada jooga waqti ka dib waxa ay yeelan karaan cilaaqaad adag oo ay la yeeshaan ilmaha facooda ah. Farqiga u dhexeeya carruurta ayaa ka yar.	Dareenka Qoyska: Walaalaha ku jira da'da kooxda waxaa loo daryeeli karaa wadajir. Tani waxay noqon kartaa mid muhiim u ah qoysaska ka soo jeeda dhaqamada oo ku tiirsanaanta aadna loo qiimeeyo. Carruurta waxay helaan faa'iidooyinka carruurta waaweyn iyo kuwa yaryar sida inay la xiriiraan, ku daydaan, wax ka bartaan, oo ay kobciyaan.
Diiwaangelinta:	Ilmaha ka taga waxa lagu badelaa ilmo ay isku da' yihiin ama isku mid yihiin da' ahaan.	Dhallaanka cusub ee la diiwaan geliyay iyo ilmaha socod baradka ah ee da' kasta oo xadkaas ka mid ah ayaa lagu dari karaa kooxda.
Goobta:	Qolku waa inuu noqdaa mid weyn oo dabacsan oo ku filan si uu u daboolo baahiyaha iyo kartida isbadelka marka ay carruurta koraan, ama kooxdu waa inay u guuraan qol loogu talagalay marxaladda xigta.	Meeshu waa inay noqotaa mid dabacsan oo si fudud ula qabsanaysa danaha iyo kartida carruurta da'doodu kala duwan tahay. Macalimiinta daryeelka dhallaanka/ilmaha socod baradka ah iyo carruurta waxay ku wada sugnaan karaan hal qol marka ay carruurta koraan.

Xaalada Daryeelka	Kooxda isku da'da ag (da'da isku Dhow)	Kooxda da'da isku dhafka ah
Xiriirada kooxaha isku da'da ah:	Carruurta isku da'da ah waxay u badan yihiin inay diyaar u yihiin inay hormaraan isla waqti isku mid ah, taas oo sahlaysa in la ilaaliyo kooxaha daryeelka aasaasiga ah.	Shati siinta ama hay'adaha kale ee sharciiyeynta ayaa laga yaabaa inay mamnuucaan isku darka dhallaanka yaryar iyo kuwa waaweyn barnaamijyada xarunta, inkastoo gobolada qaarkood, laga yaabo in laga dhaafto shatiga. Haddii macalinka daryeelka aasaasiga ah ee koowaad uusan la joogi karin kooxda oo dhan sababo la xariira xaddidaadaha da'da, carruurta waaweyn waxay u wareegi karaan goobta macalin kale oo la yaqaan ee daryeelka dhallaanka/ilm aha socod baradka ah (tusaale ahaan, macalinka daryeelka kooxda ama macalinka daryeelka sare ee shaqada kale), halka carruurta yaryar ay sii joogaan goobta macalinka daryeelka aasaasiga ah.
Qalabka ciyaarta, Agabyada, iyo Hawlaha:	Way fududahay in la siiyo hab-nololeedka ku habboon korriinka, alaabaha lagu ciyaaro, qalabka, iyo hawlaha koox kasta oo hoose marka ay carruurta ku dhow yihiin da'da.	Macallimiinta daryeelka dhallaanka iyo ilmaha socod baradka ah ee kooxaha da'da isku dhafan waa inay awoodaan inay la kulmaan danaha iyo kartida aadka u kala duwan ee dhallaanka ugu da'da yar iyo ilmaha socod baradka ah ugu da'da weyn marka loo eego jadwalka caadiga ah, deegaanka iyo alaabta carruurta ku ciyaarta, qalabka, nashaadaadka, badbaadada, iyo wixii la mid ah.
Buuxinta Baahiyaha:	Macallinka daryeelka dhallaanka/ilmaha socod baradka ah waxaa laga yaabaa inay ku adkaato la qabsiga daryeelka, tusaale ahaan, afar ilmood oo yaryar oo u baahan feejignaan aad u badan oo mid ka mid ah ama, cagsigeeda, afar ilmood oo waaweyn oo ku jira cidhiidhiga aqoonsiga sameynta iyo dhihida maya.	Macallimiinta daryeelka aasaasiga ah ee ka shaqeeya qol leh ilmaha da' ballaaran ayaa laga yaabaa inay u qaybiyaan carruurta da'dooda, laakiin waxay u badan tahay inay yeeshaan koox guud oo hoose oo isku mid ah oo iskuna da' ah, marxalad, iyo xiiso iyo karti wada leh.
Tababarka:	Tababar gaar ah oo loogu talagalay la shaqeynta carruurta marka ay ka gudbayaan marxaladda carruurnimada una gudbayaan mid kale ayaa lagula talinayaa.	Tababar gaar ah oo lagula shaqeeyo carruurta da'doodu kala duwan tahay isku mar ayaa lagula talinayaa.

WestEd. 2014. "Buug gacmeedka II.3B: Kooxda da'da isku dhafka ah ama Kooxda da'da isku midka ah? Waxay ku xiran tahay!" Gudaha *Barnaamijka Buugga Tababaraha Daryeelka Dhallaanka/Ilmaha Socod baradka ah, Cutubka II: Daryeelka Kooxda*. daabacaada 2aad. (bogga 42). Sacramento, CA: Waaxda Waxbarashada California. Dukumiintigaan waxaa laga yaabaa in loo daabaco ujeedooyin waxbarasho.